



**Washington State Office of Administrative Hearings  
(Xafiiska Dhageysiyada Maamulka Gobolka Washington)**

Waxaan si madax banaan u xallinaa qilaafaadka maamulka, waxaan adeegsanaa habab la heli karo, xaq ah, oo dhakhsa u shaqeeyo kaddibna waxaan soo saarnaa go'aano caafimaad qaba.

### **Sida Leysugu Diyaariyo Dhageysigaada Shaqo La'aanta**

Marka qofka ama ganacsiga qilaafsan yahiiin go'aanka ay gaarto Employment Security Department (ESD, Waaxda Sugidda Shaqada), Office of Administrative Hearings (OAH, Xafiiska Maamulka Dhageysiyada) ayaa dhageysan doono qilaafka kana gaari doono go'aan. Garsooraha dhageysta kiiskaada waa dhexdhexaad mana u shaqeeyo ESD.

Dhageysigaada waxaa lagu qaban doonaa telefoon. Raac tilmaamaha tafatiran ee ku dhex jira Ogeysiiska Dhageysiga si aad uga qeybgashid.

Dhageysiyada iyo go'aanada waxay ku qoran yahiiin Ingiriisi. Haddii adiga ama mid ka mid ah marqaatiyadaada u baahan yahiiin turjubaan, fadlan la xariir OAH sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtoogalka ah si aad u codsatid mid.

Haddii aad u baahan tahay fududeyn si aad uga qeybgashid, fadlan la xariir OAH sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtoogalka ah.

**Si aad u aragid tusaalada fiidiyowga dhageysiga, booqo boggena internetka [www.oah.wa.gov](http://www.oah.wa.gov)**

Waxaa lagu bixiyaa Ingiriisi iyo Isbanish

**La xariir OAH, telefoonka (509) 456-3975 ama (800) 366-0955**

### **Sida Leysugu Diyaariyo Dhageysiga**

Waxaa ku dhex jira Ogeysiiska Dhageysiga iyo warqadaha macluumaadka. Si taxadir leh u akhri warqadahaan. Waa in aad haysatid warqadahaan inta uu socdo dhageysiga.

#### **Lifaaqyada**

- Haddii aad haysatid warqado badan aad dooneysid in garsooraha uu arko, waa in aad islamarkiiba u dirtid garsooraha iyo dhamaan dhinacyada kale ee ku qoran Notice of Hearing. Ha sugin in aad soo gudbisid warqadahaada.
- OAH uma diri doonto warqado dheeraad ah dhinacyada kale. Haddii aadan u hoggaansamin tilmaamahaan, waxaa dhici karto in warqadahaada aan la tixgelinin.
- Fadlan ka saar macluumaadka qarsoodiga ka hor inta aadan warqadaha u dirin garsooraha (sida Nambarada Soshal Sekuritiga, nambarada xisaabta bangiga, nambarada shattigaa baabuurka lagu wado, iwm.).
- Lifaaqyada fiidiyowyaada ama maqalka:
  - Waa in la soo geliyo CD, DVD ama keydka yar (looma soo celin doonin diraha).
  - Nooca faylka waa in uu ahaado mid ku shaqeyn karo Windows Media Player (MP3 ama MP4).
  - Lama ogolaan doono in lagu soo diro email.
  - Waa in ay helaan dhamaan dhinacyada ugu yaraan 24 saac, dhageysiga ka hor.

#### **Cilmi Baarista**

Haddii aad xiiso u qabtid in aad cilmi baaris ku sameysid sharciyada lagu dabaqo kiiskaada, Revised Code of Washington (RCW, Xeerka La Baddalay ee Washington) iyo Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington) waxaa laga heli karaa [www.oah.wa.gov](http://www.oah.wa.gov).



**Washington State Office of Administrative Hearings  
(Xafiiska Dhageysiyada Maamulka Gobolka Washington)**

Waxaan si madax banaan u xallinaa qilaafaadka maamulka, waxaan adeegsanaa habab la heli karo, xaq ah, oo dhakhso u shaqeeyo kaddibna waxaan soo saarnaa go'aano caafimaad qaba.

**Dib u Qabashada Ballanka**

- Waa la baddali doonaa taariikhda dhageysiga haddii ay jirto keliya sabab muhiim ah in la sameeyo sidaas. Wac OAH sida ugu dhakhsiyada badan ee suurtoogalka ah. Waxaad la hadli doontaa garsoore si aad u sharaxdid sababta aad u rabsid in la baddalo taariikhda dhageysiga. Waxaa dhici karto in garsooraha ku siiyo ama diido codsigaada. Haddii ay jiraan waxyaabo kale oo qilaafsan taariikhda dhageysiga, iskuday in aad dib u ballansato waxyaabahaas marka hore.

**Marqaatiyada**

- Haddii aad dooneysid in ay ka soo qeybgalaan marqaatiyo, waxaad u baahan tahay in aad siisid tilmaamaha ku saabsan Notice of Hearing.

**Mattalaadda iyo Ilaha Sharciga**

Inta badan dadka taga dhageysiyada shaqo la'aanta waxay mattalaan naftooda. Waxaad dooran kartaa in aad yeelatid qareen, saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo ku mattala. Gobolka ma bixin doono kharashka ku baxa qareenkaada. Waxaa dhici karto in aad heshid adeegyada sharciga lacag la'aanta ama lacagta yar.

Waxaad la tashan kartaa ilaha soo socda si aad u heshid kaalmada sharciga.

Magaca Ilaha	Telefoonka	Bogga Internetka
Unemployment Law Project (Mashruuca Sharciga Shaqo La'aanta)	888-441-9178	<a href="http://www.unemploymentlawproject.org">www.unemploymentlawproject.org</a>
Washington State Bar Association (Ururka Sharciga Gobolka Washington)	800-945-9722	<a href="http://www.wsba.org">www.wsba.org</a>
CLEAR	888-201-1014	<a href="http://www.washingtonlawhelp.org">www.washingtonlawhelp.org</a>

**Waxa Ka Dhaca Dhageysiga?**

Dhageysiga wuxuu badanaa gaaraa 45 iaa 60 daqiiqo. Marka dhageysiga bilowdo, garsooraha wuxuu sharaxi doonaa kiiska iyo habka dhageysiga. Garsooraha wuxuu qof kasta weydiin doonaa in uu sheego qofka uu yahay. Waa la duubi doonaa dhageysiga. Garsooraha wuxuu go'aan ka gaari doonaa qofka hadli doono marka kowaad iyo sida ay u kala horeyn doonaan. Dhamaan dhinacyada waxay fursad u heli doonaan in ay sheegaan wixii dhacay sida ay u arkaan. Waxaa dhici karto in garsooraha weydiyo su'aalo. Garsooraha wuxuu tixgelin doonaa labo nooc oo caddeyn ah: maragfur iyo lifaaqyo.

Garsooraha wuxuu gaari doonaa go'aan ku saleysan caddeynta la soo bandhigay. Boostada ayaa laguugu soo diri doonaa go'aanka.

Dhageysiga waa fursadda keliya aad haysatid in aad sheegtid sheekadaada iyo la wadaagtdi warqadahaada. Haddii aad codsatay dhageysiga, balse aadan ka qeybgelin, waa la joojin doonaa codsigaada dhageysiga. Go'aanka ESD sidiisa ayuu u shaqeyn doonaa.

Haddii aad qilaafsan tahay go'aanka garsooraha, waxaad xaq u leedahay in aad racfaan u soo gudbisid Xafiiska Commissioner's Review Office (Dib u Fiirinta Guddoomiyaha). Racfaanka noocaan waxaa lagu magacaabaa Petition for Review (Codsiga Dib u Fiirinta). Garsooraha wuxuu tilmaamaha Petition for Review soo raacin doonaa go'aanka laguugu soo diro boostada. Taariikhda ugu dambeyso ee la soo gudbiyo Petition for Review wuxuu ku jiri doonaa go'aanka.

**Fiiri su'aalaha kale ee badanaa la weydiyo [www.oah.wa.gov](http://www.oah.wa.gov)**